



Australian Government



Ka dib tallaalkaaga COVID-19 -AstraZeneca

Markii ugu dambeysey ee la cusbooneysiyo: 30 July 2021

Ku saabsan tallaalka

Maanta waxaad heshay **tallaalka COVID-19 AstraZeneca**.

Tallaalkan wuxuu ka hortagi karaa dadka inay ku bukoodaan COVID-19. Tallaalka COVID-19 AstraZeneca kuma jiraan fayraska nool ee 'SARS-CoV-2' (fayraska sababa COVID-19), kumana qaadsiin karo COVID-19. Waxay ka kooban tahay koodhka hidda-sidaha ee qayb muhiim ah oo ka mid ah fayraska 'SARS-CoV-2' oo loo yaqaan borotiinka kor u kaca ee lagu qaado ungyadaada fayras ilaa iyo unigyadaada isdaoo la adeegsanayo fayraska dureyga caadi ah oo aan dhib lahayn (adenovirus). Jidhkaaga ayaa markaa sameeya borotiinka kor u kaca wuxuuna u adeegsanayaa inuu barto aqoonsiga iyo la dagaallanka fayraska SARS-CoV-2. Fayraska 'adenovirus' ayaa loo habeeyay si aanu u soo koobi karin mar haduu ku jiro gudaha ungyada. Tani waxay ka dhigan tahay in aanuu ku faafin karin ungyada kale aanuu sababi karin infekshin.

Maxaa laga filan karaa tallaalka ka dib

Sida tallaalka kasta, waxaad yeelan kartaa waxogaa saameyn ah kadib markaad heshid tallaalka COVID-19.

Saameynaha caadiga ah ee ka dambeeya tallaalka '**COVID-19**' **Tallaalka AstraZeneca** waxaa ka mid ah:

- xanuun, barar, damqasho, casaan ama cuncun meesha lagaa mudey
- daallan
- madax xanuun
- murqo xanuun
- lallabbo
- xumad iyo qarqaryo
- dareemid caafimaad darro
- xanuun kalagoysyada.

health.gov.au/covid19-vaccines

After your AstraZeneca COVID-19 Vaccination - 14082021 - Somali

Waxyeellooyinka **aan inta badan la sheegin ee ka dambeeya tallaalka COVID-19 Tallaalka AstraZeneca** waxaa ka mid ah:

- qanjidhada oo weynaada
- xanuun addimada hoose ah
- dawakhaad
- rabitaanka cuntada oo yaraaday
- calool xanuun.

Dhibaatooyinkan badanaa waa kuwo fudud oo badiyaa waxay ku baaba'aan hal ama laba maalmood gudahood. Waxay ku dhacaan qiyaastii saddex-meelood laba dadka la tallaalay, waxay ku bilaabmayaan maalin gudahood tallaalka ka dib oo badanaa ku baxa hal ama laba maalmood gudahood.

Qaar dadka kamid ah ee qaata waxay helidonaan calaamado durey oo kale ah oo muhiim ah tallaalkan marka la barbar dhigo tallaallada kale iyo Inta udhaxeysa hal qof 4tii ilaa 20 qof ee qaata waxay u baahan karaan waqti ka fog howlaha caadiga ah. Astaamahaan waxay aad ugu badan yihiin qabta koowaad ka dib marka loo eego qaybta labaad.

Haddii aad isku aragtid xanuun meesha lagaa mudey, xumad, madax xanuun ama jidhka 1-2 maalmood ee hore oo ku xanuuna tallaalka ka dib, waxaad qaadan kartaa paracetamol. Kani waxay gacan ka geystaan yareynta qaar ka mid ah astaamaha kor ku xusan. Uma baahnid inaad qaadatid paracetamol ama ibuprofen ka hor tallaalka. Haddii barar ka jiro meesha lagaa mudey, waxaad isticmaali kartaa cadaadin qabow.

Waxyeellooyin **dhif ah** oo la soo sheegay ka dib tallaalka **COVID-19 AstraZeneca** waa:

- Falcelin xasaasiyadeed oo daran (anaphylaxis).
 - Tani waxay dhacdaa ugu yaraan 1 milyankii qof ee qaata tallaalkan.
- Xaalad xinjireed oo yaqaano thrombosis with thrombocytopenia syndrome (TTS), taas khuseysa xinjiraha dhiiga (thrombosis) iyo heerka nugsyada dhiiga ee bilatiska (platelets) (thrombocytopenia):
 - Macluumaadka ka imanya Australiya iyo dalka dabadiisa waxey muujineyaa in xaalada TTS waa nadir
 - Xinjirowga dhiiggu wuxuu ku dhici karaa qaybaha kala duwan ee jirka, oo ay ku jiraan maskaxda (tan waxaa loo yaqaan 'cerebral venous sinus thrombosis') iyo caloosha (tan waxaa la yidhaahdaa idiopathic splanchnic vein thrombosis). Heerka hoose ee dhiig xinjirowga (low platelet count) ayaa sababi kara dhiig bax.
 - Calaamadaha xaaladan badanaa waxay bilaabmaan inta u dhexeysa 4 iyo 42 maalmood tallaalka ka dib.
 - Dadka xaaladan caafimaad qaba aad ayey u caafimaad qabaan oo waxay u baahan yihiin inay cusbitaalka tagaan. Xaaladdaan waxay u horseedi kartaa naafto muddo dheer ah, iyo xitaa dhimasho.
 - Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan TTS waxaa laga heli karaa [Patient information sheet on AstraZeneca COVID-19 vaccine and TTS](#).

Waa inaad raadsataa daryeel caafimaad tallaalka kadib:

- Waxaad u maleyneysaa inaad leedahay falcelin xasaasiyadeed. Wac 000 haddii aad isku aragtid astaamo daran, sida neefsashada oo kugu adkaata, xiiq, xiiq-garaac wadnaha ah ama isku-dhacid
- Waxaad leedahay saameyn tallaalka oo laga filayo oo aan ku dhammaan maalmo kadib.
- Waxaad isku aragtaa astaamaha soo socda, gaar ahaan 4 ilaa 42 maalmood tallaalka kadib:

- o madax -xanuun sii jira 48 saacadood ka dib tallaalka, ama soo baxa wax ka dambeeya 48 saacadood tallaalka ka dib. Xanuun -yareeyayaasha fudud ayaa laga yaabaa inay yareeyaan madax -xanuunka marka hore, laakiin way sii jirtaa
- aragga oo xumaada
- o daciifnimo xagga wejiga ama addimada ah
- o wareer ama suuxdin.
- neefta oo ku qabata
- feedha xanuun
- xanuun caloosha ah oo joogto ah
- barar lugo ah
- fin-dillaac ama nabar aan ku dhicin halka laga mudey oo aan la sharixi karin.

Hubso inaad u sheegtid dhakhtarkaaga inaad dhowaan qaadatay tallaalka. Calaamadaha aan degdegga ahayn, waxaad u tagi kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaad ee caadiga ah (badanaa GP-gaaga).

La socodka badbaadada tallaalka iyo ka warbixinta dhibaatooyinka soo raaca

Waad ku soo wargelin kartaa bixiyaha tallaalkaaga ama xirfadle daryeel caafimaad kale in aad ka shakisan tahay waxyeelo kaa soo gaadha. Kadib waxay ka sameyn doonaan warbixin rasmi ah iyagoo ku matalaya waaxdaada caafimaadka ee gobolka ama taritoriga ama si toos ah Maamulka Alaabta Daaweynta (Therapeutic Goods Administration, TGA).

Haddii aad doorbideysid inaad adigu soo sheegtid fadlan booq TGA oo raac tilmaamaha ku yaal bogga. <https://www.tga.gov.au/reporting-suspected-side-effects-associated-covid-19-vaccine>.

Tijaabinta COVID-19 tallaalka kadib

Waxyeellooyinka qaarkood ee tallaalka COVID-19 waxay la mid noqon karaan astaamaha COVID-19 (tusaale, xumad). Si kastaba ha noqotee, tallaalka COVID-19 AstraZeneca kuma jiraan fayraska SARS-CoV-2 ee nool mana sababi karo COVID-19. Waxaa laga yaabaa inaanad u baahnayn inaad heshid baaritaanka COVID-19 ama go'doomin:

- haddii aad isku aragtid calaamado guud sida xumad, madax xanuun ama daal labada maalmood ee ugu horreysa tallaalka ka dib, iy
- haddii aad hubtid inaanad lahayn wax calaamado neefsashada ah (tusaale sanko oo dareera, qufac, cuno xanuun, ur ama dhadhan oo kaa lunma).

Si kastaba ha noqotee, waa inaad hubisaa tilmaamaha hadda jira ee gobolkaaga /taritorigaaga si aad u heshid macluumaadka ugu dambeeyay. Taladan waa la beddeli karaa haddii ay dhacdo in COVID-19 uu ka dillaaco meesha. Weli waxaad u baahan kartaa inaad heshid baaritaanka COVID-19 haddii aad buuxisid shuruuda kale, tusaale ahaan haddii aad xidhiidh dhow la leedahay kiis COVID-19 oo la yaqaano. Haddii aad shaki ka qabtid, raadso qiimeyn caafimaad.

Xusuusnow ballantaada labaad

Waa muhiim inaad heshid laba qaybood oo ah tallaalka COVID-19 AstraZeneca, oo qaybtiiba ay u dhexeyso 12 toddobaad. Soo ka soo gaabinta mudada u dhaxeysa 12 toddobaad oo loo soo gaabiyey 4 toddobaad inta u dhaxaysa dhoosasku waxay ku habboonaan kartaa duruufaha qaarkood. Qaybta labaad waxey kusiindoontaa difaac ka fiican oo ah kahortaga COVID-19.

Sidee macluumaadka aad ku bixisid ballantaada loo adeegsadaa

Macluumaadka ku saabsan sida macluumaadkaaga shakhsiyeed loo ururiyo, loo kaydiyo loona istcimaalo booqo <https://www.health.gov.au/using-our-websites/privacy/privacy-notice-for-covid-19-vaccinations>